

# Stockholmshem

## Asluubta hab-dhaqanka

Xeerka aqal-kireysashada waxaa ku xusan, in aqal-kireystaha u xilsaaran yahay in u hubsado in deriskiisa marna loo geeyan wax buuq ah, iyo in uu fiirogaar ah siiyo wax alle wixii lug ku leh habsanaanta iyo hagaagga daarta hoyga. Aqal-kireystaha waxaa kaloo xilsaaran in uu hubsado in asluubta habdhaqanka kor ku xusan ay tixgeliyaan xubnaha qoyska, martida ama dadyoowga kale ee hoygiisa ku sugan ama hawl u qabanaayo.

Iyadoo ujeedada tahay fulinta qoddobada asluubta hab-dhaqanka, waxay aqal-kireystayaalka ballanqaadayaan in ay tixgeliyaan qoddobada hoos ku xusan. Nidaam-maamuleedyada waa kuwo qabyo ah, taaso macnaheeda ay tahay in xitaa qoddobada aanan hoos ku xusnayn aysan aqal-kireystaya sahalsanin. Waajibaadka kor ku xusan oo oranayaa in deriska aanan loo geysan buuq.

## Raaxada iyo wanaagsanaanta wadajirka ah awgood waxay dhammaan aqalkireystayaalka ballan-qaadayaan:

1. in qalabka muusikada loo garaciin hab deriska buuq u keeni karo.
2. in derbiyada/gidaarada musmaar lagu garaacin ama lagu duleelinin saacadaha u dhaxeeyaa 20:00 ilaa 08:00.
3. in biyaha la sii dayn wakhityda danbe ee fiidkii iyo habeenkii ba.
4. in alaabta guriga qalab la dhigin, sida, sajaayadada, baaskiil/bushkuleeti, gaariga carruurta, ”pulkor” ama wax kale xayiraad u keeni karo. Goobahaas waxaa kamid ah albaabka daarta laga soo gala, jaranjarrada iyo qolalka alaabta lagu keysado sida ”vind- iyo källargångar”.
5. in wixii hoyga ka halaabo in daahid la’aan shirkada la wargeliyo. Haddii wargelin la’aanta awgeed u dhaco dhaawac culus, waxaa xalaadaas ku xilsaaran in aad bixiso kharashka lagu hagaajin doono.
6. in had iyo jeer kor laga ilaaliyo xayawaanada gurijooga ah, lagana hortago in xayawaanku uu waxyeelo ama wasakheeyo goobaha carruurta ku ciyaaraan, goobaha dhirta lagu abuurto iyo goobaha lamid ah. Teeda kale waa in xayawaanku uu san marna helin fursad u xarig la’aan ku dhaqdhaqaaqo ama u keeno dhawaaqyo buuq leh. Shimbiraha raashin lagama siin karo daaqada/dariishada, balakoonada ama dhulka ba.
7. in ruqsad la’aan daarta hoyga lagu dhejiyo anteenada loo yaqaanno “parabolantennen”, “utomhusantennen”, boor wax ku qoran ama masawiran, “markiser” ama iwm.
8. in raashin lagu duban balakoonka, daashka ama goobaha daarta hoyga u dhow.
9. in weelasha dhirta aanan la dhigin balakoonka dhinaciisa dibadeed ama “altanrücke” iyo in aanan sajaayadooyinka iyo firaashyada sariirta laga hurgufin dariishada ama balakoonka.
10. in sigaar aanan lagu cabbin goobaha daarta dadka ka dhaxeeyaan.
11. in shirkadda Stockholmshem la siiyo magdhow kharashka booqashada heeganka degdegga “Störningsjouren”, iyo in shirkada Stockholmshem la siiyo magdhow ku saabsan ka dhaqaajinta xayiraadda sida hadba ku xusan qoddobka 4.